

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #5

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

Siyaasadda Xanuunka Shaqaalaha

OAR 333-150-0000,

CUTUBKA 2-201.11-13

2-201.11 Mas'uuliyadda Qofka Fasaxa Haysta iyo Qofka Maamulaya

2-201.12 Ka reebidda iyo Xaniibaadaha

Qofka maamulaya goobta waa in uu ka reebaa ama ka xanibaa shaqaalaha cuntada:

(A) Marka laga reebo marka astaamuhu yihiin xaalad cudur aan faafayn, waa in uu ka reebaa shaqaalaha cuntada ee leh mid kamid ah astaamaha ama calaamadaha soo socda:

(1) Matag; P

(2) Shuban; P

(3) Xanuun hunguriga ah oo qandho wata; P ama

(4) Joonis. P

(B) Ka saaro ama ka xanibo shaqaalaha cuntada ee leh nabar dheecaan leh kaasoo furan ama dheecaanka sii daynaya kuna:

(1) Yaala gacmaha ama calaacalaha, in shay aan waxba kasoo gudbayn uu ku daboolan yahay oo uu celinayo nabarka maahane hal galoofisna laga dul xirtay daboolka aan waxba kasoo gudbayn; P

(2) Qaybaha aan maradu gaarayn ee gacmaha, ilaa in nabarka uu difaacayo shay aan waxba ka gudbi karin oo ku daboolan maahane; P ama

(3) Qaybaha kale ee jirka, in nabarka ay ku daboolan tahay faashad qalalan, adag, oo aad ugu dhegan maahane. P

(C) Ka reebo shaqaalaha cuntada haddii shaqaalaha cuntada uu dhaqtar caafimaad ku sheego ama uu uga shakiyo:

(1) Norovirus; P

(2) Fayraska Cagaarshowga A; P

(3) Shigella spp.; P

(4) Enterohemorrhagic ama Shiga Toxin-Producing E. coli; P ama

(5) Tiifow (Salmonella Typhi.) P

2-201.13 Ka qaadidda Ka reebidda iyo Xaniibaadaha

SABABAH LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

Xanuuno badan oo sababa shuban ama matag waxaa ay iskaga gudbaan shaqaalaha cuntada ee xanuunsan iyo macaamiisha. Ka reebidda ama ka xanibidda shaqaalaha xanuunsan in ay ka shaqeyaan cuntada waa mid kamid ah qodobada muhiimka ah oo looga hortagayo xanuunka cuntada ka dhasha in uu ka dhaco goobtaada. Labada qodob ee kale ee muhiimka ah waa gacma dhaqashada wanaagsan iyo in aan gacmaha oo banaan aan lagu taaban cuntada u diyaarsan in la cuno.

Ma haysataa Siyaasad qoran ama afka la iskaga sheego oo ku aaddan Xanuunka Shaqaalaha? Haddii aadan haysan, waxaad u baahan tahay in aad yeelato si looga hortago xanuunada cuntada ka dhasha ee la xiriira in shaqaale xanuunsan uu cuntada sumeeyo ama saameeyo. Qofka goobta maamulaya iyo shaqaalaha cuntaduba waa in ay yaqaanaan Siyaasadda Xanuunka Shaqaalaha ayna awoodaan in ay macluumaad siiyaan marka ay maareeyayaasha goobtu ama saraakiisha sharcigu waraystaan.

Siyaasadda Xanuunka Shaqaalaha ee wanaagsani waxay ka kooban tahay saddex qaybood:

1. Maamulku wuxuu mas'uul ka yahay in uu shaqaalaha ku wargaliyo Siyaasadda Xanuunka Shaqaalaha iyo in uu shaqaalaha ku tababaro astaamaha iyo xanuunada.
2. Shaqaaluhu waa in uu gartaa astaamaha xanuunka cuntada ka dhasha uuna ogaadaa in ay tahay mas'uuliyaddiisa in uu maamulka usoo gudbiyo haddii uu leeyahay wax kamid ah astaamaha hoos ku qoran.
3. Qorshaha maamulka ee lagu xanibayo ama lagu reebayo shaqaalaha leh astaamaha, lagu sheegay, ama u baylahay, xanuunka cuntada ka dhasha.

Astaamaha xanuunka cuntada ka dhasha waa mid kamid ah waxyaabaha soo socda:

- Shuban
- Matag
- Xanuun hunguriga ah oo qandho wata
- Joonis (maqaarka iyo indhaha oo jaalle noqda)
- Dhaawacyo ama gubasho caabiq leh oo ku yaala gacmaha ama calaacalaha

Shaqaaluhu waa in aysan shaqada kusoo laaban ugu yaraan ilaa **24 saacadood** kaddib astaamaha matagga, shubanka ama qandhada wadada xanuunka hunguriga marka ay baaba'aan.



Dadka qaar ayaa isticmaala ereyga 'hargabka caloosha' si ay astaamahooda u qeexaan

Ka saar ama ka xanib shaqaalaha adeegga cuntada, haddii lagu sheego mid kamid ah waxyaabaha soo socda:

- E.coli O157:H7
- Tiifow (Salmonella Typhi)
- Shigella
- Cagaarshowga A
- Norovirus

Macluumaad dheeraad ah waxaad ka heli kartaa: <http://www.fda.gov/food/guidanceregulation/retailfoodprotection/industryandregulatoryassistance-andtrainingresources/ucm266434.htm>; Xeerka Cuntada FDA 2009, Farqada 7; adiga oo la xiriiraya Waaxda Caafimaadka Deegaankaaga.